

Tixgalinta Qoyska Shaqeysta... shaqadaada tixgalin ku muteyso!

Celcelis dhan \$710 oo
Doolar ayaa dadka loo celiyey
sanadkii la soo dhaafey!

Maxay Tahay Tixgalinta Qoyska Shaqeysta?

Waa tixgalin lacageed oo loo soo celiyo qoysaska shaqeyta oo dakhligoodu ka hooseeyo heer la jaan gooyey. Canshuurta sanadka 2020, waa in dakhligaagu ka yar yahay qiimaha hoos ku xusan:

Tirada Caruurtaada	Qoys Isku Xereysanaaya	Qaababka Xereysiga ee kale
0	\$29,100	\$23,100
1	\$48,100	\$42,200
2	\$54,300	\$48,400
3 ilmood am aka badan	\$58,000	\$52,000

Tixgalinta Qoyska Shaqeeya waxay kaa dhimeysaa qiimihii canshuurta ee lagaa qaadi lahaa, taas oo keeni karta in lacag lagu soo celiyo – xataa hadii aan canshuur lagugu leheyn.

Yaa U Qalma Tixgalinta Qoyska Shaqeeya?

Si aad ugu qalanto tixgalintaan, waa inaad marka hore tahay mid u qalma tixgalinta federaalka ee dakhliga ku soo galey canshuurtiisa – loona yaqaano (EITC), waa inaad sidoo kale tahay qof sannad buuxa ama sannad barkii deganaa gobolka Minnesota. Si aad wax badan uga ogaato tixgalintaan, booqo cinwaankeenna oo ah www.revenue.state.mn.us ka dibna ka dhex-baar (Working Family Credit) adoo baaritaanka isticmaalaaya, ama soo wac telfoonka ah 651-296-3781 ama 1-800-652-9094.

Waxaa kale oo laga yaabaa inaad u qalantid qeybo kale oo tixglin canshuureed gobolka Minnesota ah sida:

- Tixgalinta Heynta Ilmaha ama (Child Care Credit)
- Tixgalinta Waxbarashada (Xanaano ilaa Dugsi Sare) ama (K-12 Education Credit)
- Lacagta loo soo celiyo kireysteyaasha iyo milkiileyaasha leh guryaha (M1PR)

Ma heli karaa in canshuurta la iga caawiyo?

Laga bilaabo 1-da bisha Febraayo ilaa iyo bisha Abriil 5-teeda, canshuur bixiyeyaasha u qalma in la caawiyo waxay heli karaan in canshuurtooda heer federal iyo heer gobol si bilaash ah loogu diyaariyo, looguna xereeyo. Waxaad ka heli kartaa caawintaas, goobaha lagu diyaariyo canshuurta bilaashka ah ee loo yaqaan (VITA), waa hadii aad buuxiso shuruudaha hoos ku xusan:

- Inaad tahay 60 jir ama ka weyn
- Inaad tahay qof curyaan ama nafo ah
- Inaad tahay qof ku hadalka Af-Ingariisku ku yar yahay
- In dakhliga ku soo galey uu yahay \$57,000 oo doolar ama ka yar

Intaas waxaa sii dheer, barnaamijka Canshuur Caawiyaha ee hey'adda AARP, kaas oo caawiya canshuur bixiyeyaasha oo dhan, gaar ahaan kuwa da'doodu tahay 50 sano ama ka weyn.

Bisha Febraayo 1-deeda, soo booqo www.revenue.state.mn.us ka dibna ka dhex raadi (Free Tax Help) adoo isticmaalaaya baaritaanka ama soo wac 651-297-3724 ama 1-800-657-3989 si aad u hesho goob caawin oo ku dhow meeshaad deggan tahay.

